



Anansi iyo xikmad



✎ Ghanaian folktale

🗉 Wiehan de Jager

📄 Anwar Mohamed Dirie

😊 somaliska

|| nivå 3

Sagor för barn på svenska



berattelser.se

Anansi iyo xikmad

Skreven av: Ghanaian folktale

Illustrerad av: Wiehan de Jager

Översatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i

Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 3.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>



Waagii hore dadku waxba ma aysan aqoon.
Ma aynan aqoon sida miro loo beero ama
sida dhar loo sameeyo ama sida bir qalab
looga sameeyo. Illaaha cirka kore ee Nyame
ayaa lahaa xikmadi aduunka oo idil. Waxa
uu na ku kaydiyey dhari dhoobo ah.



Dhulka ayuuna jajab ugu burburay.
Xikmaddii way xorowday si qof waliba qayb
uga helo. Waana sababta ay hadda dadku u
barten sid loo beerto, sida dhar loo tosho,
qalab looga sameysto birta, iyo wax walba
oo kale oo dadku ay hada yaqaanaan sida
loo sameeyo.

Maalin maalmaha ka mid ah, Nyame waxuu goansaday in uu dhariga xikmada ah siiyo Anansi. Mar walba oo uu Anansi eego gudaha dhariga dhoobada ah, waxuu bartaa wax cusub. Waxa ayna ahayd arin aad u xiiso badan!




Waqti yar ba waxuu gaaray geedka dusha. Laakiin markiiba wuu istaagay waxa uu na ka fikiray, "Aniga un bay ahayd midka heysto xikmad oo dhan, hadana meeshan wiilkayga aya igu xariifsan aniga!" Anansi aad buu u carooday dharigi! dhoobada ayuu geedka kaso tuuray.





Damaaci Anansi waxuu ku fikiray “waa in aan ku xafidaa dhariga dusha geed dheer. Si aan dhamaan kaligay u heysto!” Waxa uu soohay xarig dheer, dharigii dhoobada ayuu ku wareejiyay, dhexda ayuuna ku sii xirtay. Waxuu bilaabay in uu geedka fuulo. Lakin aad ayay ugu adkayd fuulida geedka ayadoo dhariga ka garaacayay jilbaha mar walba.



Intaa oo dhan Anansi wiilkiisi yaraa ayaa taagnaa geedka hoostiisa oo daawanayay. Waxuu yiri, “Miyaysan sahlanaan laheyn in aad fuusho hadii aad dhariga dhabarka ku xirato?” Anansi waxa uu isku dayay ku xirashada dharigii dhoobada ahaa oo ay xikmadu ka buuxday dhabarkiisa, waxayna dhab ahaanti aheyd mid in badan fudud.